

## SIDE AYAAN U CODSADAA ?

Waxaa jira 5 tillaabo oo fudud:

- **Tillaabada 1 aad:** Xog ka hel Xarunta Hormarinta Ganacsiga ee deegaankaga soona qaado foomka codsiga (arjiga).
- **Tillaabada 2 aad:** tag kulanka xogta ku saabsan sida loo codsado deeq-bixinta.
- **Tillaabada 3 aad:** gudbi foomamkaaga is-diiwaan galinta iyo codsiga ka hor inta aan la gaarin wakhtiga ay ku egtahay balantu.
- **Tillaabada 4 aad:** sug natiijada qiimaynta.
- **Tillaabada 5 aad:** kadib marka la xaqiijiyo codsigaaga oo la tago ganacsigaaga, heshiis la saxiixo BDSC.

## INTEE AYAY QAADANAYSAA?

Geeddisocodka u dhexeeya wakhtigan la joogo iyo heshiiska waxa uu qaadanayaa qiyaastii 2 bilood.

Heshiiska aad saxiixi doontid (haddii aad guulaysato) waa 12 bilood.

## UGU DANBAYN....

Haddii aad qabtid wax su'aal ah ama aad shaki ka qabto codsigaaga, fadlan wac, iimayl u dir ama booqo Xarunta BDSC ee deegaankaaga.

Mar haddii aad saxiixdo heshiiska, BDCS ayaa kuu soo bandhigaysa tababar waxa ayna siinayaan ganacsigaaga taageero muuqata si ay u hubiyaan in mashruucaagu noqdo mid guulaysta.

Haddii aadan guulaysan wakhtigaan, ha walwalin! Waxaa jiri doona fursad labaad Luuliyo 2019-ka kaas oo ah wareeg labaad oo maalgalin ah (khayraad siin).

## SIDEE AYAAN KU HELAA XOG DHEERAAD AH?

Wax xog ah oo ku saabsan Santuuqa Deeq-bixinta:

### BDSC ITOOBIYA

Kebele 01, Zone 02

Number 022

Dolloow Ado, Itoobiya

BDSC.ethiopia@wyg.com

+251 953 366 070

### BDSC KENYA

Opp. Old town Mosque

(ku xigta Acted-Kenya),

Mandheera Old town,

Mandheera, Kenya

BDSC.kenya@wyg.com

+254 723 162 825

### BDSC SOOMAALIYA

SuuqMugdi, Luuq Road

Doloow

Gado, Soomaaliya

BDSC.somalia@wyg.com

+252 613 886 666

Waxii kale oo macluumaad ah oo ku saabsan mashruuca Boresha si guud: Boresha@drckkenya.org

Wixii kale oo macluumaad ah oo ku saabsan Midawga Yurub iyo Santuuqa Midawga Yurub ee Afrika: Delegation-kenya@eeas.Europa.eu

## ARAGTIDAADU WAA MUHIIM

Wixii ammaan ah ama cabasho ah ama aragti kale oo ku saabsan sida loo maareeyo Santuuqa Deeq-bixinta, Fadlan la xiriir: BDSC.comments@wyg.com



Soo gudbinta faafinta waxaa suurto galisay iyada oo qacan dhaqaale ay ku bixisay Midawga Yurub. Nuxurka faafinta waxaa masuuliyadeedu ay u gaar tahay Daladda Boresha (Boresha Consortium) khasabna ma aha in ay ka turjumayso aragti M.Y (EU).



**BORESHA**

**BUILDING OPPORTUNITIES  
FOR RESILIENCE IN  
THE HORN OF AFRICA**

# SANTUUQA DEEQ-BIXINTA EE TAAGEERIDDA HORMARINTA GANACSIGA

*Taageeridda ganacsiyada, Wanaajinta noloshu*



World Vision



Santuuqa deeq-bixinta ee Taageeridda Hormarinta Ganacsiga waa deeq ay fududayso hawlgalada Barnaamijka BORESHA, kaas oo ay si heer caalami ah u fuliso WYG. Deeqaha waxaa lagu bixiyaa iyada oo loo marayo Xarumaha Taageeridda horumarinta Ganacsiga (BDSC) kaas oo mashruuca laga aasaasay 3 goob . Mashruuca waxaa maalgalisay Santuuqa Midawga Yurub ee loogu talagalay arimaha degdega ah ee Afrika (EUTF).

Ujeedada guud ee Santuuqa waa in la dhiirrigaliyo hormarinta dhaqaalaha maxalliga ah, shaqo abuurka iyo abuuritaanka hanti iyada oo loo marayo kobcinta iyo kala-duwidda dhaqaalaha maxalliga ah. Tani waxaa loo samayn doona iyada oo la taageerayo ganacsiyo cusub iyo kuwo jiray.

## WAA MAXAY SANTUUQA DEEQ-BIXINTA?

Santuuqa Deeq-bixinta waxa uu ka kooban 2 qaybood:

- **“Billaw ganacsigaaga”:** Kan waxaa loogu talo galay ganacsiyada cusub (ugu yaraan in uu shaqaynayay 3 bilood) ha ahaadaan kuwo rasmi ah iyo kuwa aan ahayn rasmi, aad yaryar ama yar , iskaashatooyinka, mashaariicda dakhli aruurin iyo ururada kaydinta iyo amaahinta ee Ururada Bulshada (CBO’s) iyo Ururada Aan Dawliga ahayn (NGO’s).

- **“Kobci ganacsigaaga”:** Kan waxaa loogu talo galay ganacsiyada yaryar iyo kuwo dhexdhexaadka ah, kuwaas oo jiray ugu yaraan hal sano rabana in ay fidaan oo ay koraan.

## WAA HALKEE?

Mashruuca waxaa laga aasaasay Kenya, Itoobiya iyo Soomaliya. Kaliya waxaa la tixgalinayaa codsiyada kaliyimid deegaanada hoose.

### ITOObIYA (11 goobood)

#### Degmada Doollow Ado:

Bardale  
Yugta  
Maygag  
Sigalow  
Ramu  
Daytulu  
Fikow  
Dollo Ado town

#### Degmada Dollow Bay:

Af-Arro  
Koraley  
Dollo Bay town

### KENYA (23 goobood)

#### Bariga Mandera:

Border Point 1  
Township  
Shashafey  
Neboi  
Fikow  
Aresa

#### Waqooyiga Mandera:

Shantoley  
Girisa  
Rhamu Town  
Yabicho  
Doday  
Ashabito  
Shirshir  
Quramdow

#### Banissa:

Banisa Town  
Derkhale  
Tarama  
Kukub  
Eymole  
Kiliwehiri  
Malkamari  
Hullow  
Malkaruka

### SOOMAALIYA (8 goobood)

#### Degmada Doolow:

Dolow Town  
Wareyle  
Barabaray  
Saadhumeey  
Kurtun  
Dhaygab  
Hamare

#### Degmada Belet-Xawa:

Belet-Hawa town

## WAAXYEHEE?

Dadka codsanaya waxa ay lahaan karaan mashaariic ganacsi oo waax kasta leh oo ka mid ah dhaqaalaha laakiin 5 waaxood ayaa mudnaanta la siiyay.

- Beeraha & kalluumaysiga
- Dhismaha
- Maaraynta qashinka
- Wax soo saarka
- Adeegyada

## YAA CODSAN KARA?

Waa in aad leedahay ganacsi ama aad maamushaa ganacsi ama ku hawlan tahay waxqabad faa'iido lagu doonayo.

Mashruucaan waxaa loogu talo galay in uu gacan siiyo waxqabadyada dhaqaalaha, kuma saabsana tababar, ama caafimaad ama biyo iyo nadaafad. Waxa uu ku saabsanyahay hormarinta fursadaha ganacsi iyo dhaqaalaha maxalliga ah, shaqo abuurid iyo kobcinta ganacsiga isaga gudba xaduudaha. Waxaa u qalma in ay helaan Ganacsiyada aadka u yaryar, kuwa yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah (rasmi iyo kuwa aan rasmi ahaynba); iskaashatooyinka iyo mashaariicda dakhli soosaarid iyo nolol maamleedka ee Ururada Aan Dawliga Ahayn kuwaas leh rajo dhaqaale (NGO).

## LACAG INTEE DHAN?

Wadan kasta waxaa uu leeyahay miisaaniyad lacageed oo siman ahna USD 132,000 wadarta miisaaniyadda Santuuqa deeq-bixintana 2 sano ee soo socotana waa USD 400,000.

“Billaw ganacsigaga” waxaa lagu bixinayaa, deeq inta ugu badan ay tahay: USD 6 000

“Kobci ganacsigaaga” waxaa lagu bixinayaa, deeq inta ugu badan ay tahay: USD 12 000

Wixii faahfaahin ah ee ku aadan inta ay dhantahay deeqda marka loo badalo lacagtaada maxalliga ah ee aad adeegsato, waxaad la xiriirtaa Xarunta Taageeridda Hormarinta Ganacsiga (BDSC) ee Deegaankaga.

## INTEE JEER OO DEEQ-BIXIN AH?

Waxaad codsan kartaa marmar badan waxaanad diri kartaa in ka badan hal arji laakiin waxaad kaliya heli kartaa hal deeq.

Waxaan qiyaasaynaa in aan u qaybin doono in u dhaxaysa 15 ilaa 30 deeq-bixin wadan kasta.